**War** faafin

# Dib u habaynta AHS si sare loogu qaado daryeelka bukaanka

Noofambar 17, 2022 Weydiimaha saxaafadda

## Tallaabooyin degdeg ah ayaa la bilaabayaa kuwaas oo horseedi doona in la dadajiyo wakhtiga EMS, la yareeyo wakhtiyada sugitaanka qolka maydka iyo yaraynta wakhtiga sugitaanka qalniinka ee dadka reer Alberta.

Alberta waxay leedahay shaqaalaha gurmadka caafimaadka ee ugu wanaagsan dunida dowladda Albertana waxay ka shaqayn doontaa in ay u diyaariso taageerada saxda ah si loo xaqiijiyo in dadka reer Alberta ay helaan daryeelka ay u baahan yihiin goorta iyo goobta ay uga baahan yihiin. Wakhti xaadirkaan, hanaanka daryeelka caafimaadka ee gobolku ma awoodo in uu daboolo baahida sii kordhaysa dawladduna waxay qaadaysaa tallaabooyin ay arinkaas wax uga qabanayso.

"Bukaanadu waxay wakhti dheer sugaan hanaankeena daryeelka caafimaadka, ayada oo ay waliba dhaqaatiirta, kalkaalisooyinka, iyo shaqaalaha caafimaadka iyo gurmadka kale ee degdega ah ay shaqo wanaagsan hayaan. Waxaan u baahanahay tallaabo degdeg ah si aan sare ugu qaadno helitaankiisa. Dadka reer Alberta waxay doonayaan in isla xisaabtan uu kajiro gudaha AHS waxayna doonayaan inay ogaadaan in hannaan caafimaad iyo daryeel heer sare ahi ay udiyaar yihiin marka ay u baahdaan."

*Danielle Smith, Hoggaanka*

Ayada oo ah tallaabada koowaad ee qorshaha dib u habaynta AHS, Dr. John Cowell ayaa loo magacaabay sarkaalka sida buuxda u maamulaya wuxuuna badalayaa guddiga agaasinka aan sida joogtada ah u shaqayn ee Alberta Health Services

Classification: Public

(AHS). Dr. Cowell wuxuu si toos ah u hoos imaanayaa Hoggaanka iyo wasiirka caafimaadka.

Dr. Cowell wuxuu si toos ah ula shaqayn doonaa Mauro Chies, madaxa AHS ee kumeelgaarka ah, si wax looga qabto afar hadaf:

## Sare u qaadidda wakhtiyada rogaal celinta EMS

Dadka reer Alberta ee wajahaya xaaladaha caafimaad ee degdegga ah waxa ay wakhti dheer sugaan shaqaalaha caafimaadka xirfadleyaasha ah ee sida aadka u tababaran ee Alberta iyo EMT-yada si ay usoo gaaraan oo isbitaalka ugu qaadaan. Tabashooyinka Alberta kuma saabsana tayada daryeelka ay helaan, laakiin waxay ku saabsan yihiin dheeraanta wakhtiga ay ku qaadanayso in ay helaan daryeelka. Si loo xaqiijiyo in dadka reer Alberta inay si degdeg ah u helaan gurmadka caafimaad ee degdegga ah, Dr. Cowell waxay ka shaqayn doontaa in ay gaarto afar waxyaabood oo waaweyn:

- Ambalaasyo degdeg ah oo lagu wareejiyo qolalka xaaladaha degdega ah si shaqaalaha caafimaadku ugu diyaarsanaadaan wicitaano dheeri ah.
- Isticmaalka gaadiidka ku habboon ee loogu tala galay qaadista aan xaaladaha degdega ahayn ee goobta dhexdeeda.
- La xoojiyo kala dirista EMS si loo joojiyo wicitaanada ka imaanaya 911 ee soo gaaraya Health Link ayada oo lagu salaynayo baahida bukaanka.
- Xoojinta shaqaalaha caafimaadka si ay u go’aansadaan in bukaanku u baahan yahay in si degdeg ah loogu wareejiyo ER iyo in kale ayada oo la adeegsanayo ambalaas.

Si loola socdo horumarka laga sameeyay wakhtiga rogaal celinta EMS-ka loona cabbiro guusha hindisaha, Alberta Health waxay eegi doontaa afar cabbir:

- wakhtiga wicitaanka 911 illaa inta ambalaasku ka imaanayso
- wakhtiyada ka saarista bukaanka ER
- tirada wicitaanada aan xaaladaha degdega ahayn ee ambalaastu qabatay
- tirada wicitaanada ‘la joojiyay’ ee ka imaanaya 911 soona gaaraya Health Link

## Yaraynta wakhtiyada sugitaanka ER

Classification: Public

Dadka reer Alberta ee u baahan daryeelka caafimaadku waxay ku sugaan wakhtiyo dhaadheer oo aan la aqbali karin qolalka xaaladaha degdegga ah. Ayada oo looga mahad celinaayo khibradda iyo u heelanaanta dhakhaatiirta, kalkaalisooyinka iyo xirfadleyaasha kale ee daryeelka cafimaadka, dadka reer Alberta waxay helaan daryeel heer sare ah, laakiin waxay ku qaadanaysaa wakhti dheer in ay helaan. Dowladda Alberta waxay u xilsaartay Dr. Cowell si uu sare ugu qaado helitaanka daryeelka caafimaadka asaga oo adeegsanaya laba qaab oo aasaasi ah:

- Keenista xirfadleyaal daryeel caafimaad oo dheeraad ah si sare loogu qaado daryeelka bukaanka goobta lagu siinayo iyo maaraynta.
- Ka wareejinta tiro dheeraad ah oo ah bukaanada sariiraha isbitaalada ayada oo loo wareejinayo goobo daryeel oo ku habboon sida daryeelka guriga, goobaha daryeelka muddada dheer iyo xarumaha daryeelka aan joogsiga lahayn.

Si loo cabbiro guusha laga gaaray hindeseyaashaan, dowladdu waxay la socon doontaa wakhtiga ay qaadanayso laga bilaabo marka bukaanku soo galo qolka xaaladaha degdegga ah(ER) illaa marka uu helaayo heerka daryeelka ku habboon ee uu baahan yahay.

## Yaraynta wakhtiga sugitaanka qalliinka

Ku dhawaad 68,400 oo dadka reer Alberta ah ayaa hadda sugaya qalliin si looga caawiyo sare u qaadidda caafimaadkooda iyo tayada noloshooda. Tiradaasi waxay hoos uga soo dhacday 81,000 oo reer Alberta ah kuwaas oo sugayay wakhtigii uu cudurka safmarka ahaa marayay heerkii ugu sareeyay laakiin waxay wali ka sarreysaa heerkii cudurka safmarka ah kahor oo ahaa 68,000. Si loo xaqiijiyo in qof walba uu helo qalliinka uu u baahan yahay qaab wakhtiyaysan, Dr. Cowell waxaa loo xilsaaray in uu kala shaqeeyo AHS-ta sidii si weyn loogu kordhin lahaa qalliinka lagu sameeyo isbitaalada aan aadka loo isticmaalin, ee badanaa ku yaalla dhulka miyiga ah, iyo goobaha qalliinka loogu tala galay.

Si loo cabbiro guusha hindiseyaashaan, Alberta Health waxay tixgalinaysaa cabirada soo socda:

- heerka isticmaalka qolalka qalliinka ee isbitaalada AHS-ta

Classification: Public

- heerka qalliinka ku dhacaya wakhtiga sugitaanka ee caafimaad ahaan la aqbali karo

- wakhtiyada sugitaanka qalliinka

## Samaynta dib u habayno muddada dheer ah ayada oo la adeegsanayo wada tashi lala yeelanayo shaqaalaha xaaladaha degdegga ah

Xallinta hannaanka daryeelka caafimaadku waxay u baahan tahay labadaba tallaabo degdeg ah iyo shaqo muddo dheer socota. Ayada oo natiijooyinka qaar loo arki doono si dhakhso ah, sii joogtaynta hannaanka daryeelka caafimaadka Alberta muddada dheer, waxay ubaahan tahay in isbedello kale oo aasaasi ah la sameeyo. Dr. Cowell waxaa loo xilsaaray xaqiijinta in muddo sannado ah iyo jiilalka soo socdaba ee dadka reer Alberta ay awood uyeeshaan in ay isku halayn karaan hanaanka daryeelka caafimaadka ee ay bulsho ahaan maalgaliyaan si uu diyaar ugu noqdo marka iyo goobta ay ugu baahdaanba. Si arinkaas loo sameeyo, Dr. Cowell wuxuu ka shaqayn doonaa hindeseyaasha soo socda:

- Kusoo celinta go’aan qaadashada heer maxali ah iyo xirfadleyaasha daryeelka cafimaadka ee maxaliga ah.
- Dhiirrigalinta ikhtiraacyada gobolka si loo bixiyo adeegyo caafimaad oo dheeraad ah.
- Soo jiiddashada xirfadleyaasha daryeelka caafimaadka oo dheeraad ah.

Dib u hagaajinaha muddada dheer micnaheedu wuxuu noqon doonaa in nantiijooyinka aan si dhakhso ah loo arki doonin. Si kastaba ha ahaatee, horusocodka iyo guulaha hirgelinta dib u hagaajinaha muddada dheer ah waxaa lagala socon doonaa wakhtiyada sugitaanka adeegyada caafimaadka iyo isu dheellitirnaanta bulshada iyo xirfadleyaasha.

Asaga oo ah maamulaha rasmiga ah ee AHS-ta, Dr. Cowell wuxuu awoodi doonaa in uu hogaanka u qabto isbadalka aadka loogu baahan yahay si ka dhakhso badan sida hadda ay AHS-tu u maamusho ayada oo caafimaadka dadka reer Alberta la siinayo muhiimadda koowaad. Dr. Cowell wuxuu warbixin ka siin doonaa dadka reer Alberta 90 maalmood gudahood horumarka laga gaaray qorshaha dib u hagaajinta AHS-ta.

## Warbaahinta

- Daawo war saxaafadeedka